

4.1

Ma ku hadashaa luqad aan ka ahayn Ingiriis?

Ma jeclaan lahayd inaad hesho mutarjum si uu kaaga caawimo la xiriirida adeegbixiyaha?

Waa xaqaaga in aad hesho mutarjum haddii aadan fahmin waxa adeega caafimaadka ama iintu kuu sheegaayaan.

Si aad u hesho mutarjum:

- Wac adeega aad rabto inaad la hadasho
- U sheeg inaad u baahan tahay mutarjum
- U sheeg luqada aad ku hadasho
- Ka tag magaca iyo nambarka telefoonka

Adeega ayaa ku soo wici doona marka mutarjum lala soo xiriiro. Tani waxaa laga yaabaa inay waqti qaadata sidaas darteed haddii aad balan leedahay aadna rabto in mutarjum la hello waxaad u baahan tahay inaad ogeysiin bixiso.

Mutarjumiinta ayaa waxaa la heli karaa iyada oo la wacayo 131 450 lana sheegayo luqada aad ku hadasho oo aad u baahan tahay. Kani wuxuu ku kacayaa qiimaha meeshaad joogto haddaad guriga ka soo wacayso moobaylkuna waa qiimaha moobaylka. Waxaa jira qiima la xiriira adeegaan, kaas oo \$21 15kii daqiiqaba.

Ma jeclaan lahayd inaad la kulanto lana hadasho dad aad isku dhaqan tihiin?

Waxaa jira dhowr meelood oo aad aadi karto kuwaas oo kugu caawimi kara adeegyo iyo kaalmo dhaqan ahaan kugu haboon:

Xarumaha Awoodgelinta Soogalootiga (Migrant Resource Centres):

251 High St Preston	9496 0200
13 Munro St Coburg	9384 7900
187-189 High Street Thomastown	9463 7800
78-82 Second Ave Altona	9391 3355
45 Main Road, St Albans	9367 6044

Action on Disability within Ethnic Communities (ADEC)

175 Plenty Rd Preston 9480 1666

Ma u baahan tahay macluumaad la la xiriira caafimaadka oo luqadaada ku qoran?

La xiriir Migrant Resource Centre ee agtaada ah. Xaruntaas awoodgelinta Soogalootiga haysaa macluumaad caafimaad oo lagu tarjumay dhowr luqadood.

Ma u baahan tahay macluumaad ku saabsan adeegyada iinta?

Si aad u hesho macluumaad ku saabsan adeega iinta ee agtaada ah la xiriir:

- **Golaha Degmada**

Waxaa laga yaabaa inaad u baahan tahay inaad akhrido xaashida kitkan 4.7 ee ah 'Sidaan ula xiriirayaa golahayga degmada?'

- **Action on Disability within Ethnic Communities (ADEC)** on 94801666

Haddii aad awoodo inaad hesho internet (haddii aadan guriga joogin isku day saaxiibo, maktabad ama neighbourhood house) booqo www.healthtranslations.vic.gov.au

Halkaan waxaa ka heli doontaa dhamaan macluumaad caafimaad oo lagu tarjumay oo ka badan 45 luqadood oo aan Ingiriis ku jirin.

Haddii aadan geli karin internetka, dhakhtarkaaga ayaa awoodi doona inuu kuu hello mautarjum si afkaaga ku hadla si uu kaaga caawimo sidii aad ku heli lahayd macluumaadka aad u baahan tahay.